

Sharci 27 ee 14/4/1999

Khidmada ay qaado wasaarada
Xodaha Beeraha iyo Deegaanka

Xanaanada
Deegaanka

FAAFINTA



RASMIGA

الرسمية

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 1^{aad}

Garoowe, 25 Setember 1999

Lam,1R9

FAAFINTA BILWALBA KA SOOBAXDA

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

Sharci

- ◆ Sharci Lam.7 ee 14/04/1999, "Dib u habaynta Xafiiska Diiwaangelinta Gaadiidka Dhulka (Ufficio P.R.P)".....Bogga..... 87
- ◆ Sharci Lam.8 ee 14/04/1999, "Khidmadda Dayuuradaha iyo Rakaabka"..Bogga..... 93
- ◆ Sharci Lam.9 ee 14/04/1999, "ku saabsan Hirgelinta Canshuuraha Dhexe (Canshuuraha Berriga)Bogga..... 96
- ◆ Sharci Lam. 10 ee 14/04/1999, "Canshuuraha Furadada.....Bogga..... 103
- ◆ Sharci Lam.11 ee 14/04/1999, "Kuna saabsan Khidmadda ay qaado Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Beeraha iyo Deegaanka.....Bogga..... 116
- ◆ Sharci Lam.12 ee 19/04/1999, "Dakhliga Dawladaha Hoose iyo ku talagalka Miisaaniyadda Degmoyinka PuntlandBogga..... 118

Qaybta Labaad

Xeer

Xeer Madaxweyne No. 25 ee April 8, 1999,
magacaabid Hawl-wadeeno Dawladeed, Bogga.... 128

Qayta Saddexaad

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

Waxba ma leh



XAFIISKA MADAXWEYNAHA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Tix :

Tariikh :

Ref. :

Date :

Sharci lam.11 ee 14/4/1999 kuna saabsan Khidamadda ay qaado
Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Beeraha iyo Deegaanka,

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY: Axdiga Dawladda Puntland,

ISAGOO TIXGELINAAYA: Ansixinta Golaha Wakiilada ee ku cad
warqadda summadeedu tahay GW/159/1999 taariikhdeeduna tahay 12/4/1999,

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Ood. 1aad

Khidmadda ay qaado Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Beeraha iyo Deegaanka
ee ku xusan tabeelaha Sharcigaan ku lifaaqan waa la ansixiyey,


Ood. 2aad

Saddex nuqul oo sharcigaan ka mid ah, ee uu saxiixay Madaxweynaha iyo
lifaaqiisa, waxaa loo qaadanayaa asal (originali) waxaana lagu kala kaydinayaa:
Xafiiska Garyaqaanka Guud 1 (hal) nuqul; Xafiiska Xoghaynta Golaha
Wakiilada 1 (hal) nuqul iyo Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada 1 (hal) nuqul,

Ood. 3aad

Sharcigaanu wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha
Dawladda; waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda; wuxuu
Sharcigaan ka mid noqonayaa sharciyada Dalka; Qof kasta waxaa ku waajib ah
inuu dhawro kuna dhaqmo.

Garoowe 14/4/1999


Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda





WASAARADA XANAANADA XOOLAHA
IYO BEERAHA

Ref: _____

Date: _____

KHIDMADA AY QAADO WASAARADA XANAANADA XOOLAHA

4. Khidmada laga qaadi doono baaritaanka caafimaadka ee waxyaabaha dibedda loo dhoofsho sida xoolaha nool, kalluunka, hilibka, hargaha, caanaha, subaga, Argoosatada iyo dhegaha libaaxa iyada oo lagu saleeyey khidmadihii laga qaadi jiray ka hor intii aan burburku dhicin, laguna daray hoos u dhaca qiimaha shilinka Soomaaliga ah waa sidan:-

Ari (Riyo Iyo Ido)	300 Sh.So. (Sadex Boqol Sh.So)	Neefkii
Lo	1200 Sh.So (Kun Iyo Laba Boqol Sh.So)	Neefkii
Geel	1500 Sh.So(Kun Iyo Shan Boqol Sh.So)	Neefkii
Hargaha (Lo Iyo Geel)	100 Sh.So (Boqol Sh.So)	Haragii
Hargaha (Ariga)	50 Sh.So (Konton Sh.So)	Haragii
Kalluunka	100 Sh.So (Boqol Sh.So)	1kg
Hilibka Ariga	300 Sh.So (Sadex Boqol Sh.So)	Neefkii
Subagga	100 Sh.So (Boqol Sh.So)	Litirkii
Caanaha	100 Sh.So (Boqol Sh.So)	Litirkii
Argoosto	200 Sh.So (Labo Boqol Sh.So)	1kg
Dhagaha Libaax Badeedka	200 Sh.So (Labo Boqol Sh.So)	1kg